# BAARITAANLA LEEDHKA EE MACAAMIISHA SPRWS

Waxaa dhawaanta la bedelay tubooyinka biyaha ee gurigaaga soo gala. Marka tuboyinka leedhka ka sameysan laga saaro, waxaa suurogal in leedhku ku haro tubooyinka gudaha ee guriga muiddo bilo ah. SPRWS waxa ay idin siineysaa hab baaritaan loogu sameeyo biyaha la cabo ka dib marka tubooyinka la bedelo.

Fadlan raac tilmaamaha si aad u soo gudbiso muunad biyaha laga qaaday. Taas waxa la doonaya in lagu xaqiijiyo in aysan tubooyinka ku harin leedh dheeraad ah.

## Waxaa ka mid ah:

- Tilmaamo qoraal ah (qoraalkan)
- 1 L dhalada muunadda iyo Foomka COC
- Warqadda soo diridda ee lacagtala sii bixiyey
- Bakadda (baakadda meel dhig si aad ugu soo dirto muunadda)

**Fadlan muunadda ka soo qaad sadex todobaad gudahood marka u uku soo gaaro oo ku so dhaji warqadda la socota ee lagu soo dirayo.**

1. Waa in aadan biyaha guriga isticmaalin ugu yaraan lix saacadood ka hor inta aadan muunadda ka qaadion. Taas inta badan waa ariorta hore ama marka aad guriga ku soo noqotaan. Si aad muunadda u qaado, marka hore daboolka ka qaad.



2. Isticmaal biyaha QABOOW ee biyaha jikada.



3. Biyaha ka buuxi ilaa ay soo gaaraan “garbaha dhalada”.



4. Daboolka si adag ugu xir.



5. Buuxi foomka cadeynaya sida la isugu gudbiyey foomka (COC) oo ku rid sanduuqa.

Isticmaal qalin oo buuxi macluumaadka oo dhan.



6. Foomka COC iyo muunadda ku rid baakadda oo ku dhaji foomka boostada loogu dirayo.



Ka dibna ku rid boostada ama xafiiska boostada ee USPS.

Haddii baakadu ku soo gaaro iyada dhaawac gaaray, fadlan soo wac TruePani ee 855-660-9965.

Boosatada ku soo dir 3 cisho gudahood ka dib marka aad soo qaado muunadda.

Waxaan kuu soo direynaa natiijada baaritaanka marka ay dhamaato. Waxaa laga yaabaa in ay qaadato 2 ilaa 4 todobaad si loo ogaado natiijada.

Shaqaalaha ku takhasusay tayada biyaha ayaa ka jawaabaya wixii su’aalo ah oo aad qabtaan adinkaga jawaabaya ama idiin faahfaahinaya natiijada ee 651-266-1635.

Shaqaalaha Barnaamijka SPRWS ayaa ka jawaabaya su’aalaha oo aad kala xiriir kartaan at lead@stpaul.gov ama 651-266-6820.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad, la xiriir Barnaamijka SPRWS ee 651-266-6820. Iyaga ayaa turjubaan la imanaya.